

Ku Daritaanka Qof Weyn Qabanqaabada Taageeradaada Magangelyo-doonka

Janaayo 2010

Somali

Haddii aad hadda ka hesho taageerada magangelyo-doonka (hore loogu yaqaanay NASS) Hoom Ofiska (UK Wakaaladda Xuduudaha) oo ninkaaga, xaaskaaga ama lamaankaagu kuugu yimaadeen Scotland; waxa suurtagal ah in aad ku biirin karto qof weyn taageerada aad hesho.

Ogow in ku daritaanka qofka weyn taageeradu **aanu** macnaheedu ahayn in lagu daray codsigaaga magangelyo-doonka. Waxaanu kugula talinaynaa in aad mar kasta taas kala hadasho wakiilkaaga arrimaha sharciga, iyada oo isbedelada xaalada qoyskaagu ay ku **yeelan karaan** kiiskaaga socdaalka (imigarayshanka).

Xaashidan waxay qeexaysaa cidda lagu dari karo ee qof weyn ah taageerada magangelyo-doonka laga helo Hoom Ofiska, waraaqaha loo baahan yahay in lagu kabo codsiga taageerada iyo sidaan kuu gargaari karno.

Ayaa lagu dari karaa taageeradaada ee qof weyn ah?

Haddii aad isku-dayeyso in aad ku darto qof weyn oo kugu tiirsan taageeradaada magangelyo-doonka, waa **inay** og yihiin Hoom Ofisku. Haddii aanay la xidhiidhin Hoom Ofiska, ama aanay weligood codsan magangelyo gudaha UK, waa inaad la hadasho wakiil sharci kahor inta aanad qaadin tallaabo dheeraad ah.

Si loogu daro taageerada magangelyo-doonka ee aad ka hesho Hoom Ofiska lammaanahaagu waa inuu buuxiyo mid ka mid ah shuruudaha hoose. Waa in:

- aad is-qabtaan; **ama**
- uu kula noolaa sidii laba qof oo aan is-qabin gudaha UK ugu yaraan laba saddexdii sanno ee ugu danbeeyey; **ama**
- inuu kugu tiirsanaa codsigaaga magangelyada kahor intii aan la soo diidin.

Waa maxay dhokomentiyada loo baahan yahay inaan keeno si loogu daro lamaankayga inuu noqdo qof igu tiirsan?

Si loogu daro qof weyn oom kugu tiirsan qabanqaabadaada taageerada, waa inaad u qorto codsi qoraal ah Hoom Ofiska oo aad labadiina adiga iyo lammaanku saxeeixdeen. Waa inaad keento caddaynta xidhiidhkiina. Caddaymaha la oggol yahay waxa ku jira:

- shahadadaada guurka
- shahaadada dhalashada ilmahaaga oo muujinaya ninka, naagta ama lammaanka oo waalid u ah

Haddii aan lagu qabin **ama** aanad ahayn shahaadada guurka **ama** shahaadada dhalashada ilmahaaga, waxaad keeni kartaa:

- caddayn qoraal ah oo sheegaysa inaad lammaanu ahaydeen muddada waraysiga Hoom Ofis ama codsigaagii taageerada magangelya-doonka
- waraaqo ama biilasha korontada/biyaha oo ay ku qoran yihiin labadiina magic oo isla cinwaan keliya ah
- nuqulada sheegashadaada cusub ee magangelya-doonka ama Su'aalaha Sharciga ah ee faahfaahinaya ku-tiirsanaha oo xaqiijinaya xidhiidhkiina

Sideen kuu gargaaraa?

Waxaan kaa gargaari karnaa adiga iyo lammaankaaga dhamystirka codsiga hore ee Hoom Ofiska. Fadlan ogow in siyaasadayda tahay in aanu adiga iyo lammaankaag gooni ula kala hadalo kahor gudbinta codsiga.

Waxay qaadan kartaa tiro toddobaadyo ah inay Hoom Ofis kaga shaqeyaan codsigaaga. Hoom Ofis ayaa toos kuugu soo qori doona si ay kuugu sheegaan go'aankooda. Haddii aanad wax xidhiidh ah ka heli Hoom Ofiska kadib afar toddobaad, fadlan nala soo xidhiidh.

Haddii aad rabto inaad cusboonaysiiso faahfaahinta sida laguula soo xidhiidhayo ama aad rabto inaad noo sheegto isbeddelka oo ku yimid xaaladaada, waxaad naga soo wici karta **talefonkayaga bilaashka ah: 0800 085 6087** oo la hadal shaqaalaha kiiska ee shaqada jooga. Ogow in talefonakayaga bilaashka lagala hadli karo keliya talefon guri.

Maxaa dhacaya haddii codsigayga la diido?

Haddii codsigaaga la diido, waxa laga yaabaa inaan awoodno in aan kaa gargaarno codsashada racfaan hay'ad madaxbaaan oo la yidhaahdo Guddiga Taageerada Magangelyo-doonka "Asylum Support Tribunal (AST)". Faahfaahinta racfaanku waxay ku xidhan tahay sababaha Hoom Ofisku ay ku bixiyaan diidmada taageerada.

Waxaad weydiin kartaa inaad timaad racfaanka gudaha London haddii aad rabto inaad kiiskaaga hordhigo Guddiga "Tribunal" shakhsi ahaan adigu. Haddii hore ugu sii sheegto Hoom Ofiska inaad rabto inaad timaad, waxa laga yaabaa inay awoodaan inay kaa bixiyaan socdaalkaaga.